



Minnesota waxaa jira wax ka badan 10,000 oo sababood oo aad ugu baahan tahay in aad hesho ceymis caafimaad.



Iyo hal meel oo aad ka heli karto.

MNSure waa suuq furan oo reer Minnesota ay ka heli karaan, is barbardhigi karaan, kana dooran karaan, ceymiska caafimaadka ee ku haboon baahidooda iyo miisaaniyadooda.

MNSure adinka ayey idiin adeegeysaa, haddii aad iibsaneyso ceymiska caafimaadka oo aad naftaada u rabto, ama aadan laheyn ceymis caafimaad. MNSure. Waa goob kaliya oo aad ka heli karto haddii aad xaq u leedahay mid qiime jaban ama ceymis caafimaad oo lacag la'aan ah.

Dooro, Qiimee, Munaasibna ku ah

MNSure waa goobta kaliya ee ugu wanaagsan, una gaarka ah reer Minnesota ee ay ka heli karaan ceymiska caafimaadka.

Doorashada: Hal meel oo aad kila heli karto ceymiska caafimaadka oo ka doorataan laba ka mid ah shirkadaha ceymiska caafimaadka ee magaca dheer.

Macluumaad si cad loo dhigay: Goobta waxaa si cad loogu qeexayaa ceymis kasta oo caafimaadka ah oo si fudud loo dhigay oo la is dhinac dhigay si la isula barbardhigo.

Habka codsiga oo la fududeeyey: Waxaa lagaa doonayaa oo kaliya in aad buuxisaan hal codsi oo adiga iyo qoyskaaga ee ceymiska caafimaadka ee doorashada MNSure.

Qofna loogama reebayo xaalado caafimaad oo horey u jirey: Ma jiri doono in laga reebo xaalad horey u jirtay ama muddo uu qofku sugayo taasoo ku sleysan xaalad caafimaad oo horey u jirtay.

Cidna looma diidayo ceymiska caafimaadka: Cidna hada ka dib looma diidayo ceymiska caafimaadka ama lagama qaadayo lacag dheeraad ah iyada oo ay ugu wacan tahay taariikhdooda caafimaadka.

Ma jiro xad u go'an kharashka sanadlaha ah ama inta qofku nool yahay : Ma jiri doonto in ceymisku xadidio lacagta uu sanadka kasta ama inta qofku nool yahay bixinayo.

Caawinaadda: Ka iibso bartya internetka ee MNSure.org, waxa aad ku caawinaya hay'adaha bulshada ama dulaala ama aad caawinaad ka heli kartaa shaqaale tababaran oo telefoonka talo kugu siinaya oo ka tirsan MNSure. La soo xiriir xarunta macaamiisha ee MNSure (1-855-3MNSURE).



MNSureSM

Where you choose health coverage

[MNSure.org](https://www.mnsure.org)

Shaqsiyaadka iyo Qoysaska Jaantus

[f /MNSure](https://www.facebook.com/MNSure) [@MNSure](https://www.twitter.com/MNSure)

Ceymiska Caafimaadka oo leh faa'iidooyin tayo sare leh

- Ka hortagga iyo wanaag ahaashaha
- Isbitaal la dhigo
- Adeegga ambalaaska
- Dhaqan celiska iyo dib u daryeelka adeegga iyo qalabka caafimaadka
- Adeegga gargaarka degdegga ah
- Daawada dhakhtarku qoro
- Adeegga sheybaarka
- Dhalmada iyo ilmaha dhasha
- Dhakhaatiirta caruurta iyo aragga
- Adeegga iyo caafimaadka waxyaabaha la isticmaalo

Taariikhaha muhimka ah

1da Oktoobar 2013 - 31ka Maarso 2014

Mudada ay furan tahay is diiwaangelinta

1da Janaayo 2014

Ceymiska caafimaadka aya bilaabanaya; qof kasta waxa uu sharciiga dawladda dhexe waajib kaga dhigayaa in ay ceymis caafimaad.

Kharash yar

Ceymiska aad ka iibsato MNsure oo kaliya ayaad xaq ugu yeelan kartaa casnuur dhaaf yareyneysa kharashka aad bil kasta bixiso caafimaadka .

- Qofka kaligiis oo dakhligiisu gaarayo \$45,960
- Qoys tiradoodu ka kooban tahay 4 qof dakhligooduna gaarayo ilaa \$94,200

Waxa kale oo suurogal in aad xaq u yeelato keyd dheeraad ah adiga oo u sii maraya karashka oo aad wadaagtaan taasoo yareyneysa lacagta aad ku bixiso daryeelka caafimaadka; kharashyada kale sida lacagta lagaa jaro, lacagta aad bixiso marka aad dhakhtarka tagto, iyo tan aad u bixiso ceymiska.

- Qofka kaligiis oo dakhligiisu gaarayo \$28, 725
- Qoys tiradoodu ka kooban tahay 4 qof dakhligooduna gaarayo ilaa \$58,875

Medical Assistance iyo MinnesotaCare waxa laga heli karaa MNsure iyada oo si guud loo dhigay macaashka ay bixinayaan. MinnesotaCare waxa ay soo bandhigeysaa kharashka caafimaadka ee bil kasta oo la yareeyey, iyada oo aan xad loo sameyn bixinta kharashka isbitaalka oo aysn jirin muddo la sugayo iyo waxyaabo kale oo dheeraad ah.

Waxa aad bixineyso

MNsure oo kaliya ayaa shakhsiyaadka iyo qoysasku ka ogaan karaan haddii ay xaq u leeyihiin canshuur dhaaf kaas oo markiiba yareyneysa kharashka caafimaadka ee ceymiska caafimaadka ee gaarka ah. Qaarkood ayaa laga yaabaa in ay xaq u yeeshaan ceymiska caafimaadka oo lacag la'aan ah ama qiime jaban ee Medical Assistance ama MinnesotaCare.

Xubnaha Qoyska	Dakhliga Sanadkii Soo Gala				Wax ka badan
	Ilaa	Ilaa	Ilaa	Ilaa	
1	\$15,282	\$22,980	\$31,597	\$45,960	\$45,960
2	\$20,628	\$31,020	\$42,652	\$62,040	\$62,040
3	\$25,975	\$39,060	\$53,707	\$78,120	\$78,120
4	\$31,322	\$47,100	\$64,762	\$94,200	\$94,200
5	\$36,668	\$55,140	\$75,817	\$110,280	\$110,280
Qof kasta oo dheeraad ku dar	\$5,347	\$8,040	\$11,055	\$16,080	
Medical assistance dadka waaweyn: \$0 kharashka ku baxa bil kasta	Ceymiska caafimaadka ee MinnesotaCare dadka waaweyn: \$21 ilaa \$50 bil kasta dadka waaweyn	Canshuur dhaaf loo sameeyo ceymiska caafimaadka dadka waaweyn ee gaarka ah. Kharash bil kasta oo aad u hooseeya \$0 ka dib marka loo sameeyo canshuur dhaafka.			Kaas oo aad hoos ugu dhacaya \$77 bishiiba dadka waaweyn iyada oo yareyneysa kan caruurtana. Xaq uma laha canshuur dhaaf.
Ceymiska caafimaadka ee Medical Assistance ee caruurta yaryar oo da'doodu u dhaxeeyo 0 ilaa 18 sano iyo haweenka uurka leh. Haweenka: \$0 kharashka ku baxa bil kasta			Canshuur dhaaf lagu siiyo ceymiska gaarka ah ee caruurta		

437,000 qof oo reer Minnesota ah oo aan laheyn ceymiska caafimaadka ayaa suurogal ay tahay in laga caawiyo qeybta kaga soo aadan ceymiska caafimaadka sida ay muujineyso daraasad ay sameysay Wasaaradda Caafimaadka ee Minesota 2011kii. 296,000 oo ka mid ah ayaa shaqeyaa.

Si aad u ogaato macluumaad dheeraad ah, iska diiwaangeli oo ka hel caawinaadda aad u baahan tahay: MNsure.org

La soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah oo laba af oo kala duwan looga hadlo: 1-855-3MNSURE (1-855-366-7873)